



Bayaankii Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland Guadalupe Guerrero uu Ka Soo Saaray Kulankii Caadiga ahaa ee Golaha Waxbarashada Ok. 26 Kaasi oo La Carqaladeeyey

Oktoobar 27, 2021

Bayaankani soo socdaa waa bayaanka Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) ee uu soo saaray Guddoomiyaha Waxbarashada Guadalupe Guerrero:

“Habeenkii aan soo dhaafnay, Golaha Waxbarashada PPS waxa lagu ballansanaa in loo kulmo qof ahaan shirkoodii caadiga ahaa. Arrimaha ajandaha ee u qorsheysnaa in lagaga hadlo kulanku waxay ahayd in la waajibiyo tallaalka ardayda kaasi oo soo jiiday inay ka soo qeybgalaan dad fara badani, in badan oo ka mid ahi iyaga oo aan la wadaagin dareenkooda dhinaca caafimaadka iyo nabadgelyada guud ahaan bulshadeena. Qaar ka mid ah dadka ka soo qeybgalay kulanka waxay dhismaha xarunta PPS soo galeen iyaga oo xiran maaskarada afka lagu daboolo, ka dibna waa ay iska saareen maaskaradii iyaga oo diiday inay u hoggaansamaan dhammaan codsiyadii PPS ee ka qeybgalayaashu in la raaco fulinta uu gobolku guud ahaan waajibiyey in la xirto maaskarada. Ka dib markii lagu guuleysan waayey in loo hoggaansamo xirashada maaskarada, Guddoomiyaha Golaha Michelle DePass waxay joojisay kulankii iyada oo u wareejisay isla waqti yar ka dib dhinaca online-ka. Xitaa markii dib goluhu shirkii u bilaabay, waxaa gudaha dhismaha ku sii haray qaar badan oo ka mid ah kuwii shirka ka soo qeybgalay iyaga oo aan xirneyn maaskaradii.

“Waxaan aad uga xumahay in qaar ka mid ah dadkii ka soo qeybgalay ay si cad iskaga indho tireen shuruuda gobolka oo dhan ee ah in la daboolo afka, in lagu abuurdo khatar caafimaad ardayda Portland, qoysaskooda, shaqaalaha, xubnaha warbaahinta iyo xubnaha Golaha Waxbarashada. Haddana tani wax la aqbalayo ma aha. Inkastoo aan soo dhaweyneyno cabirida aragtiyaha kala duwan ee shirarka dadweynaha, Guddoomiye DePass waxay qaaday tallaabadii saxda ahayd inay dooda u wareejiyo dhinaca fogaan-aragga, marka aad eegto in xubnaha dhageystayaasha qaar ka mid ahi oo aan rabin inay ilaaliyaan raacitaanka shuruudaha in la xirto maaskarada afka sidii loo ilaalin lahaa caafimaadka dadweynaha. Mid ka mid ah waxyaabaha dugsiyada degmadu ay horumariyaan waa in dadweynuhu u doodaan si ilbaxnimo ku jirto. Iyo iyada oo aan taageerno in ardaydayadu sii wadaan inay kor u qaadaan ka qeybqaadashada sidii ay yihiin hoggaamiyaasha bulshada.

“Xalayto ardaydeena iyo shaqaalaha waxay sidoo kale kulmeen aflagaado loo addeegsaday luqad cunsurinimo xambaarsan. Hadalada nacaybka xambaarsani maaha kuwa looga dulqaadanayo bulshadeena. Dhacdadani waxay meel ka dhac ku tahay qiyamkeena dhinaca cadaalada sinnaanta iyo cadaalada bulshada, ixtiraamka, daacadnimada, iyo karaamada. Waanu qiimeynaa iyada oo aan ixtiraameyno qof kasta oo bulshadeena ka mid ah iyada oo aan geesta

kalena rumeysanahay kala gedisnaan inay inaga dhigeysa bulsho xoog badan. Qof kasta waan ku soo dhaweyneynaa PPS iyada oo qof kastaana ka mid yahay. Qof kastaa wuxuu u qalmaa jawi aan kaga doodi karno arrimaha saameynta inagu leh iyo meel aynu dareemi karno nabadgelyo iyo amni. Hadafkeenu wuxuu yahay sidii aan u kobcin lahayn jawi ixtiraam leh oo la dareemayo in la wada leeyahay. Dhacdadani waa diiwaan ahaan baa loo keydiyey iyada oo la raacayo habraacyada wax lagaga qabanayo arrimahani oo kale marka ay dhacaan. Waxaan siineynaa addegyo lagu taageerayo shaqaalaha ay saameynta ku yeelatay arrintani, iyada oo aan la xiriirneynay sidii loo siin lahaa taageero ardayda iyo shaqaaluhu ay u xakameyn lahaayeen qalalaasaha bulshada ee Agabkeena Qalalaasaha iyo Ka Qeybgalka Bulshada ([PPS Civic Engagement and Unrest Toolkit](#)).

Tallaabooyinka Xiga ee Wada Hadalada Shuruudaha Tallaalka

Ka dib wada hadaladii wax ku oolka ahaa ee ay qabteen Golaha Waxbarashada Dugsiyada PPS, Golaha Waxbarashada waxay go'aansadeen inay dib u dhigaan cod qaadistii mawduucan ugu horeyn ilaa la gaarayo bisha Noofembar 16keeda. Tani waxay inoo oggolaan doontaa fursado dheeraad ah oo aan ku dhageysano qoysaska PPS, ardayda iyo inaan hubino in shaqaaluhu ay siiyaan golaha macluumaad dheeraad ah oo ay codsadeen sidii ay uga caawin lahayn xogogaal ugu noqoshada go'aankan adag ee muhiimka ah.

Golaha Waxbarashada PPS waxaa ka go'an inay dhageystaan ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha bulshada. Dugsiyada Dadweynaha Portland sidoo kale waxay qoysaska ku soo dhaweyneysaa inay aragtidooda ay aragtidooda kula wadaagaan ku saabsan mawduucan warcelintooda iyada oo qoraal ah halkan [PPS.net/contact](#).

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay weydiisanayaan bulshada Portland inay la wadaagto warcelintooda wax ku oolka ah iyaga oo ka soo qeybgalaya si ixtiraam ku jiro wada hadalada ku saabsan suurtagalnimo shuruuda tallaalka. Dugsiyada Degmadu waxay ammaan u soo jeedinayaan ardayda PPS ee ku muujiyey aragtidooda kala duwan si dareen laxaad lihi ku jiro.